

Sida loo galo Kulliyada College Bound

Markaad dhammayso dugsiga sare, waa muhiim inaad fahamto ballanqaadka Kulliyada College Bound iyo sababta aad u heli karto ama u waayi karto. Barnaamijkan ayaa kaa caawin kara inaad iska bixiso waxbarashadaada dugsiga sare ka dib haddii aad [u qalanto](#).

Imisa ayaad heli doontaa?

- Tani waxay ku xiran tahay dhowr waxyaalood: 1. Dakhliga laga soo sheegay codsigaga kaalmada maaliyadeed (FAFSA ama WASFA); 2. Nooca [kulliyadda ama tababarka waxbarasho](#) ee aad doorato; iyo 3. Heerka diiwaangentinaada (labada gelin ama gelin).
- [Abaalmarintu](#) waxay ku salaysan tahay kharashka caadiga ah ee waxbarashada (heerka kulliyadda dadweynaha), kharashyada qaar, iyo qaddar yar oo buugaagta ah.
- Waxaa laga yaabaa inaad hesho abaal-marin yar Kulliyada College Bound, ama in laguu diido abaal-marin, haddii badi ama dhammaan maalgelinta aad xaqa u leedahay ay ka timaaddo kaalmada dhaqaale ee kale ee gobolka, sida [Washington College Grant](#) (WA Grant).
- Iyadoo laga yaabo in kaalmada maaliyadeed ee gobolku aanay daboolin dhammaan kharashyada kulliyadda, waxaad heli doontaa dhammaan kaalmada maaliyadeed ee gobolka ee aad u qalanto. Noocyada kale ee kaalmada maaliyadeed, sida deeqda Pell Grants, shaqo-barashada, amaahda, iyo [deeqaha waxbarasho](#) ayaa laga yaabaa inay kaa caawiyaan kharashyada kale.

Raac tillaaboooyinkan si aad u hesho maalgelintaada Kulliyada College Bound:



Waxa aad u baahan tahay inaad samayso:

- Buuxi [Shuruudaha Ballanqaadka Kulliyada College Bound](#).
- [Buuxi FAFSA ama WASFA](#) sanadkaaga ugu dambeeyaa ee dugsiga sare iyo sanad walba aad sii wadato waxbarashadaada. **Fiiro gaar ah:** Dugsi kastaa wuxuu leeyahay waqtiyada kama dambaysta ah ee kaalmada dhaqaale oo ay tahay inaad raacdo.
- Iska diwaangeli kulliyad hal sano gudaheed markaad dhammayso dugsiga sare.
- Ka qaybgal mid ka mid ah in ka badan [65 dugsi oo u qalma Washington](#).

Waxa ay shaqaalaha College Bound samayn doonaan:



- Inay Isku beegaan codsigaaga kaalmada maaliyadeed iyo codsigaaga Kulliyada College Bound.
- Si lagugu aqoonsado inaad tahay arday ku xiran kulliyadda College Bound iyo kuliyyadaha ku taxan FAFSA ama WASFA - gaaga.

Si aad u heshid caawimo ku saabsan abaal-marinahaaga kaalmada dhaqaale, u-qalmitaankaaga, ama habka, la xiriir xafiiska kaalmada maaliyadeed ee kulliyadda.

Waxa kuliyyadaadu qaban doonto:

- Waxay go'aamin doonaan haddii dakhligaagu uu buuxiyo shuruudaha u-qalmitaanka ee ku salaysan FAFSA ama macluumaadka WASFA sanad walba.
- Waxay xisaabin doonan kaalmadaada dhaqaale waxayna kuu soo dirayaan abaal-marin muujinaysa inta kaalmo lacageed ee aad heli doonto. La xiriir iyaga si aad u ogaato sida iyo goorta lagugu wargelin doono.
- Waxay bixin doonaan kaalmadaada dhaqaale oo ay ku jiraan deeqaha WA Grant iyo miisaaniyada kulliyada College Bound haddii aad u qalanto.

Su'aalaha?

Si loo xaqiijiyo haddii aad ku jirto barnaamijkeena, la xiriir barnaamijka kulliyada College Bound:

Limayl: collegebound@wsac.wa.gov.

Taleefanka: 888-535-0747, doorashada 1-aad.

Wax badan ka oggow kulliyada College Bound:
collegebound.wa.gov.

Wax badan ka oggow qorsheynta mustaqbalkaaga linkiganwsac.wa.gov/actionplan.

